



Macluumaa
dka bukaanka


Ornibel®
cinjirka xubinta
taranka



Macluumaadkan bukaan ku qoran macluumaad waxtar leh oo muhiim ah oo ku saabsan cinjirka xubinta taranka **Ornibel®**. Fadlan si taxadir leh u akhri macluumaadkan iyo warqada baakada dawada ka hor inta aanad isticmaalin **Ornibel®**.

Ornibel® waa garaangar caaga ah oo jilicsan iyadoo loogu talogalay inay urka kaa illaalo. Waxay ku jira labada hormoon ee kala ah Eostrogen iyo Progestin, waxayna u shaqeeyaan si la mid ah sida kaniinka ka hortagga urka ee isku dhafan. Qadarka hormoonka yar ah ee ay sii dayso, awgeed **Ornibel®** ayaa loogu arkaa inay tahay dawada ka hortagga urka oo doos yar hormoon bixisa. Waaad **Ornibel®** u galineysaa si la mid ah sida aad u geliso tampaun kadibna meesha ku daa muddo saddex toddobaad ah.


Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xiriir umulisadaada ama dhakhtarkaaga.



Hal bil oo ka hortagga uurka iyadoo

Ornibel® waa garaangar jilcan oo la iska dhex arki karo (dhexroorkiisa 54 mm iyo gudub ahaan 4 mm) kaas oo farjiga la geliyo si.

Ornibel® ayaa farjiga lagu ridee. Marka cinjirka xubinta taranka meesha la geliyo, **ayay kuuro yar oo hormoonnada soo daysaa**.



Ornibel® – Ka hortagga uurka oo isku dhafan

Sidee ayay Ornibel® uga hortagtaa uurka?

Waxay Ornibel® ugu shaqeysaa si la mid ah sida kaniinka ka hortagga uurka ee isku dhafan, waxaanay kuu difaacaysaa saddex siyaabood:


Ma soo ugxn qubi doontid, maadaama aadan isku arki doonin calaamadaha ugax siideynta.

Wasaqda minka afkiis (afka hore ee ilma galeynka) ayaa bararaya waxaana adkaan doonto in shahwadu u gudubto.

Xuubka ilmo galeenka ee ilmo-galeenka geduha ayaa isbeddeli doona, si aanay ukun ugu dhagi karin oo aanay ugu kori karin.

Waxtarka ayaan is dhimin haddii shuban/matag kugu dhaco

Marka hormoonnada Ornibel® ay si toos ah uga galaan wareega dhiiga iyagoo ka soo baxaaya xuubka ilmo galeenka ee farjiga ayaan, shuban iyo matagu saameyn doonin waxtarka ilaalada.



Ornibel® – Badel ama billoow habkaaga ka

Jadwalka soo socda waxa ku jira tilmaamaha sida loogu bilaabaayo isticmaalka Ornibel® ama sida looga soo beddelanaayo waxyaalaha ka hortagga uurka ee kale.


Aan hormoonnada ka hortagga uurka qaadan bishii ugu danbeysay	Ka soo bedelanaaya dawado kale oo ka hortagga uurka ee isku dhafan	Ka soo bedelanaaya kiniinka yaryar ee ka hortagga uurka, aalada ka hortagga uurka ee la geliyo, irbad a ma hormoonka IUD
Bilow inaad isticmaasho Ornibel® maalinta koowaad ee wareegga dabiiiciga ah ee caadadaada (tusaale ahaan maalinta dhiigu kaa imanaayo).	Ornibel® waa in la geliyo ugu dambayn maalinta ku xigta maalintaada ugu danbeysa ee aanay qaadan kaniinka ama balastarka ka hortagga uurka, ama maalinta ka dambeysa xilliga kaniiniga macmalka ah (ee dawadaadii ka hortagga uurka ee hore).	<ul style="list-style-type: none"> Kasoo badalasho kiniinka yaryar ee ka hortagga uurka: mar kasta Kasoo badalasho usha balastiga ah iyo hormoonka IUD: maalinta lagaa saaray Kasoo badalasho irbada: maalinta laguu qorsheeyey inaad irbada qaadato
		FG! Iisticmaal wax kale oo kaa illaliya (tusaale ahaan cinjirka galmeda) inta lagu jiro 7 maalmood ee ugu horreeya ee aad isticmaasho Ornibel®.

Akhri warqada baakada dawada ee ku jirta baakada Ornibel®.

Sidee ayaan u isticmaalaa Ornibel®?


Intaanad giraanta galin ka hor

- Fadlan hubi inaan giraanta wakhtgeedu dhicin.
- Gacmahaaga dhaq ka hor intaanad giraanta galinin ama ka saarin.
- Dooro booska aad dareemeysyo inuu kuugu fudud yahay. Tusaale ahaan, waxaad ku istaagi kartaa meel adigoo hal lug kor u qaadaya, jilbaha laaba, ama jiifso.



Si aad giraanta ugu geliso

- Cinjirka xubinta taranka baakada ka saar.
- Cinjirka xubinta taranka ku qabo suulka iyo farta murdisada dhexdooda, dhinacyada isku riix oo cinjirka xubinta taranka geli farjigaaga.
- Waa inaanad waxba dareemin markay cinjirka xubinta taranka meesha ugu jirto.
- Haddii aad raaxo darro dareemeysyo, si taxadar leh cinjirka xubinta taranka u riix wax yar farjigaaga gudhiisa.
- Si joogto ah ugu hubi in cinjirka xubinta taranka si sax ah ugu jirtogudaha farjigaaga (tusaale ahaan ka hor iyo ka dib markaad galmo sameyso).



Cinjirka hakugu jiro sadax isbuuc, hal isbuucna iska saar


Iska saarista cinjirka xubinta taranka

- Waa in cinjirka xubinta taranka farjiga 3 toddobaad si joogto ah ugu jirto marka laga soo bilaabo wakhtiga la galiyey.
- Wuxaad cinjirka xubinta taranka ka saari kartaa adigoo fartaada murdisada ku soo qabanayaa gunta hoose ee giraanta, ama adigoo dhinaca giraanta qabanaaya, oo ka dibna ka soo jiidaaya.
- Cinjirka xubinta taranka ka saar 3 toddobaad ka dib markaad geliso, isla maalin toddobaadka oo isku mid ah iyo qiyas ahaan isla waqtii isku mid ah.

Tusaale ahaan, hadddii aad Ornibel® galiso maalin Arbaco ah. 8 fiidnimo, waa in aad ka saartaa sadex todobaad ka dib maalin Arbaco ah 8 fiidnimo. Wax ku xusuusya sameyso. Markaad cinjirka xubinta taranka ka saarto waxaad u baahan tahay hal toddobaad inaad ku nasato. Todobaadkaas gudhiisa waa inuu dhiigu kaa yimaado.

- Billoow inaad cinjirka xubinta taranka oo cusub isticmaasho hal todobaad ka dib xitaa haddii aanu dhiiggu kaa joogsan.

Akhri warqada baakada dawada ee baakada Ornibel® ku jirta.



Cinjirka xubinta taranka la isticmaalay ku tuur qashinka gurigaaga, iyadoo la door-bidaayo inay baakadeeda ku jirto. Cinjirka zubinta taranka ha raacin biyaha musquusha.

Ornibel® – Su'aalaha badanaa la is weydiyo*

Waxtarka faaidada ilaalineed bisha oo dhan ma jiraya?



Haddii cinjirka xubinta taranka si sax ah loo isticmaalo, waxay **uurka kaa ilaalin doontaa bisha oo dhan**, marka lagu doro toddobaadka aanad cinjirka xubinta taranka xidhneyn.

Goorma ayay tahay inaan cinjirka xubinta taranka lagaliyo marka koobaad?



Wixii maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo bilaabo isticmaalka **Ornibel®** ka akhri bogga 5 ama warqada baakada dawada.

Sidee ayaa Ornibel® loo keydiyaa?



Ornibel® waa in lagu keydiyaa **meel aan iftiinku toos ugu dhaceynin**. Marka laga hadlaayo **heerkulka**, ma jiraan wax **tilmaamo gaar ahi**.

Maxaan sameeyaa haddii cinjirka xubinta taranka raaxo darrolagu dareemaayo?



Haddii aad raaxo darro dareemeyso, **si taxadar leh cinjirka xubinta taranka ugu riix wax yar farjigaaga gudahiisa**.

*Warqada baakada dawada ka fiiri maclumaad dheeraad ah.

Maxaan sameeyaa haddii aan cinjirka xubinta taranka muddo dheer u isticmaalay?



Haddii cinjirka xubinta taranka farjigaaga uu ku jiray wax ka badan 3 toddobaad **laakiin aan ka badnayn 4 toddobaad**: Hal mar cinjirka xubinta taranka ka saar. Dib u billow muddadii caadi ahaan u kala dhaxeysay ee halka todobaad ka dibna geli cinjirka xubinta taranka oo cusub. Haddii cinjirka xubinta taranka uu farjigaaga ku jiray wax **ka badan 4 toddobaad**, waxa laga yaabaa in waxtarka ka hortagga uurka uu hoos u dhaco, waa inaad hubisaa inaanad uur laheyn ka hor intaadan cinjirka xubinta taranka cusub gelin.

Maxaan sameeyaa haddii cinjirka xubinta taranka si qalad ah ugu soo baxdo?



Ku dhaq cinjirka xubinta taranka biyo qaboww **ama diirran oo isla markaasba dib u geli**. Haddii cinjirka xubinta taranka uu farjiga ka baxsanaa in ka badan 3 saacadood, waxa laga yaabaa in waxtarka ka hortagga uurka uu hoos u dhacao taas oo ku xiran todobaadka wareegga/dawradaada ee aad ku jirto. **Fiiri warqada baakada dawada wixii tilmaamo ah**.

Miyaan isticmaali karaa tampon-ka?



Waxaad tampon isticmaali kartaa markaad isticmaalayso **Ornibel®**. Haddii cinjirka xubinta taranka uu farjiga ka soo baxo, dhaq cinjirka oo ku celi.

Cinjirka xubinta taranka mala dareemi karaa xiliga galmada la sameynaayo?

Waa wax aan caadi ahayn in cinjirka xubinta taranka la dareemo xilliga galmada la sameynaayo. Hubi in **cinjirka xubinta taranka uu meeshiisa kujiro galmada ka dib**. Haddii cinjirka xubinta taranka soo baxaayo, waa la saari karaa inta la sameynaayo galmada. Hase yeeshiee, waa in dib loo geliyaa **3 saacadood** gudahood si aanay waxtarka ka hortagga uurka ugu saamaynin.

Ornibel® – Su'aalaha inta badan la is weydiyo

**Miyaan bedeli karaa
maalinta koowaad ee
dhiiggayga caadadu
bilaabmaayo?**



Haddii aad cinjirka xubinta taranka u isticmaasho si tilmaamaha waafaqsan, waxaad dareemi doontaa dhiig baxaaga caadada (caadadaada) inta lagu jiro muddada bilaa cinjirka xubinta taranka ah. Haddii aad rabto inaad beddesho maalinta uu dhiiggaagu bilaabmaayo, waad soo **gaabin kartaa** (laakin waligaa ha dheerayn) **muddadaada xigta ee bilaa cinjirka xubinta taranka ah.**

Ma isticmaali karaa daawada fungal iyo shahwada dila?

Daawooyinka fangas-ka iyo shahwada (maadooyinka shahwada dila) ee lagu isticmaalo farjiga.

*Inkasta oo aanay tani ahayn hab la isku soo jeedinaayo, waxa suurtogal ah in dib loo dhigo.

**Miyaad dib u dhigi karaa
dhiiggayga caadada?**



Haddii aad rabto inaad dhiiggaaga caadada dib u dhigto, **farjigaaga isla markaaba geli cinjirka xubinta taranka oo cusub** ka dib markaad ka saarto giraantii hore, iyadoo aanad raacin wareega bilaa giraanta ah*. Cinjirka xubinta taranka cusub ayaa meesha lagu deyn karaa **waxaan ka badnayn 3 toddobaad**. Marka aad rabto in dhiiga caadadu bilaabmo ayaad kaliya cinjirka xubinta taranka uun ka saareysaa farjiga. Raac wareega/doorka **caadiga ahaa ee halka todobaad ee bilaa cinjirka xubinta taranka ah** ka dibna geli cinjirka xubinta taranka oo cusub.



Ornibel® – Saameynaha xun ee imaan kara

Ornibel® waxay keeni kartaa saameyno xun-xun, laakiin kuwaas dadka isticmaala oo dhan ma yeeshaan. Qaar saameynaha xun ee caadi ahaan yimaada ka mid ah (waxay ku dhici karaan ilaa 1 qof 10 kii haweenba) waxa ku jira dliqa, damqasho naasaha, madax xanuun, lallabbo iyo dheecaan ka badan oo kaa yimaada. Haddii aad la kulanto wax saameyn xun ah, fadlan la xiriir umulisadaada/dhakhtarkaaga.

**Dawooyinka ka hortagga uurka iyo halista
xinjirowga dhiigga ee isku dhafan**

Dhammaan dawooyinka ka hortagga uurka ee isku dhafan waxay kordhiyan khatartaada xinjirowga dhiiga. Hase yeeshiee, khatarta guud aad ayay uga yar tahay, marka tusaale ahaan uur la leeyahay. Waxa muhiim ah inaad ogtahay arrimaha kordhin keeni kara halistaada xinjirowga dhiigga, iyo calamadaha iyo waxyaalaha ay tahay inaad ka digtoonaato.

**Waxa ay khatarta xinjirowga dhiiggu
aad u badan tahay:**

- haddii miisaankaagu sa'a'id u badan yahay
- haddii aad 35 jir ka weyn tahay oo aad sigaarka cabto
- haddi aad umushay dhowrkii todobaad ee ugu danbeeyey gudahood
- mudada lagu jiro sanadka ugu horeeya ee aad kiniinada ka hortagga uurka isticmaalayo ama marka aad hadana

dib ugu billowdo inaad kaniinka isticmaasho ka dib maraad ugu yaraan 4 toddobaad ka nasatay

Ka digtoonow calaamadaha xinjirowga dhiigga, gaar ahaan haddii:

- aad dhawaan qaliin gashay
- aanad sariirta ka kici karin wakhti muddo dheer ah
- aad diyaarad ku safri doonto wax 4 saacadood ka badan

Isla markaasba la xiriir dhakhtar haddii aad mid calaamadahan ka mid ah dareemyo:

- xanuun xun ama barar lugtaada ah
- naqaska oo si lama filaan ah kuugu qabta ama aad si ka degdeg badan ugu neefsanayso, xanuun xun oo laabta ama qufac si lama filaan ah kuugu yimid
- dheelitirka oo aad kaaga luma ama dawakhad, garaaca wadnaha oo degdeg ah ama aan caadi aheyn, xanuun caloosha oo xun wajiga gacmaha iyo lugaha oo diciif ku noqda ama ku kabuubyooda (gaar ahaan haddii ay taasi hal dhinac oo jidhka ah)
- ku dhaco), hadalka ama wax fahamka oo kugu adag, jahawareer hal mar kuu yimaada, aragtida oo hal mar kaa tagta ama aanad saani waba indhaha uga arag, madax xanuun/dhanjaf xun kaas oo sidii hore ka sii daran

Macluumaadka alaabta oo la soo gaabiyey

Ornibel® (etonogestrel/ethinylestradiol), 0.120 mg/0.015 mg 24 kii saacba, galinta farjiga. Daawooyinka dhakhtarku qoray iyada oo aan la kabin. **Calaamadaha:** Ornibel waxa weeye ka hortagga uur qaadida oo ah qaab cinjirka xubinta taranka lagu gelinaayo farjiga waxaan loo isticmaalaa sida ka hortagga uurka. **Digniino/taxadir:** Isla markaaba raadso daryeel caafimaad haddii aad aragto wax calaamado xinjiraha dhiiga kuwaas oo muujinaaya inaad lugahaaga ku leedahay xinjiraha dhiiga, xinjiraha dhiiga ee sanbabadaada, wadnaha oo ku istaaga, shaqada bereko yaraata, faalig, aragtida indhaha oo yaraata, ama farjigoo iska dhiiga. La xiriir dhaqtarkaaga ama kal kaalisada sida ugu dhaqsiyaha badan haddii aad isku aragto calaamadahan, sida xanuun aan la garaneynin ee xabadka, dhexda ama lugaha. Warqada baakada daawada waxa sidoo kale ku jira xog ku saabsan waxyaalaha khatarta ah iyo macluumaadka ku saabsan xaaladaha ay tahay inay haweenku joojiyaan isticmaalka Ornibel, ama haddii ku kalsoonanta Ornibel laga yaabo in ay hoos u dhacdo. **Saameynta xun ee caadiga ah:** Xanuun caloosha, lallabbo, infegshanka fangaska ee farjiga (tusaale "candida"), cinjirka xubinta taranka oo ku dhibta, cuncun xubinta taranka, dheecaan ka imanaaya farjiga, madax xanuun ama dhanjaf, dareen aan fiicnayn, rabitaanka galmoda oo yaraada, damqasho naasaha, xanuunka miskaha, caadada oo ku xanuujisa, finan, miisaanka oo kordha, iyo cinjirka xubinta taranka oo farjiga kasoo baxda. Xiriirk: Exeltis Sverige AB, Strandvägen 7A, 114 56 Stockholm, Sweden. Telefoonka: +46 (0)8-586 335 10. Emaylka: nordics@exeltis.com. Macluumad la soo gaabiyey oo ku salaysan warqada baakada dawada oo ku taariikhaysan 15/12/2021.

Fadlan si taxadir leh u akhri warqada baakada dawada ka hor inta aanad isticmaalin **Ornibel®**. Waxa ku jira macluumaad adiga kuu muhiim ah. **Waxa aad ka helaysa warbixin muhiim kuu ah adiga.**

Fadlan ogow: warbixintan waxaa laga soo guuriyay markeedi ugu horeysay Swedish. Waxaa loogu tala galay in lagu kaabo talooyinka bukaanada aan iswiidhishka aheyn. Haddii uu shaki jiro, fadlan ተ xiriir dhaqtarka kuu qoray.